

Retail Food Vehicle/Portable Structure or Cart



Macluumaadka dukumintigaan ku qoran waa kuwo dhaqan gelaya waqtigaan xaadirka ah ee taariikhda la daabacay. Maadaama shuruucdu isbedesho, waxaa muhiim ah in aad hubiso si aad u ogaato in shuruucda iyo nidaamyada maamulka ee ku khuseeya la bedelay ama wax cusub lagu daray. Dukumintigaan waxaa loogu talo galay tilmaam bixin oo kaliya, kumana qorna wax kasta ee lagaaga baahan yahay in aad sameyso. Waaxda Beeraha ee Minnesota (Minnesota Department of Agriculture [MDA]) ayaa go'aamineysa waxyaalaha dhabta ah ee looga baahan yahay shatiga marka ay dib u eegaan dhamaan arimaha ku saabsan ganacsigaaga cuntada.

1

Waxyaalaha koowaad ee lagala hadlayo xafiisyada gobolka, ama magaalada/degmada

- Isha **biyaha**
- Habdhiska Biyaha Wasakhda ah (bullaacadda)**
- Shuruudaha kala-xadaynta ganacsiga cuntada**
- Caymiska Magdhowga Shaqaalaha** haddii aad qorsheyneyso in la siiyo lacag ama magdhow
- Kormeerista **Dhismaha**
- Kormeerista **Dabka**
- Kormeerista **Biyo gelinta**
- Kormeerista **Koronto gelinta**
- Kormeerista **HVAC** (Kulayliyaha Mukeyka)
- Shahaadada Degitaanka**
- Dib-u-eegista Qorshaha Tafaariiqda**
- Ruqsadaha kale ee laga yaabo inaad u baahato**

2

Waxyaalo kale oo ay tahay in la eego

- Barxad u helista ganacsigaaga
- Samaynta liis ah cuntada aad samayso, gaddo ama siiso dadwaynaha
- Garashada macaamiishaada
- Gunaanadka habka cunto soosaarkaaga
- Halka aad ka helayso waxyaalaha aad cuntada ka samayso
- Helitaanka meelaha cuntada lagu kaydiyo
- Baakadaynta iyo summadaynta waxsoosaarka
- Sharciga Cuntada Minnesota (Minnesota Food Code) (MN Rule 4626 [Sharciga MN 4626])
- Shardiga Maareeyaha Cuntada ee Muctarifka ah
- Tafaariiqda HACCP iyo Ogolaanshaha gaarka ah ee Sharciga Cuntada

3

Waxyaalaha loo baahan yahay ballanta shati-siinta ee aad la leedahay kormeeraha

- Lambarka Aqoonsiga Cashuurta MN AMA** lambarka Sooshal Sikuuradka
- Caymiska Magdhowga Shaqaalaha** haddii aad qorsheyneyso in la siiyo lacag ama magdhow
- Jeegga ama Dalabka Lacagta (Money Order)** ah ujrada shatigaaga.